



Golaha Waxbarashadu Wuxuu Ansixiyey Barnaamijka Isqorista iyo Isku Dheelitirka Xuduudaha Sanad-dugsiyeedka 2021-22

Febraayo 17, 2021

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ee PPS,

Waxaanu rabnaa inaan idinla socodsiino go'aanadii ugu dambeeyey ee ku saabsan barnaamijka isqorista iyo isku dheelitirka oo dhaqangali doona laga bilaabo sanad-dugsiyeedka 2021-2022 Koonfurta-bari ee Portland. Go'aanadani waxay gabogabeeyeen [Golaha Waxbarashadu kulankoodii Qabsoomay Janaayo 26keedii](#).

Goluhu go'aankani waxay ku meel mariyeen 5-2 cod ah, [Qaraarka Lambarkiisu yahay 6236](#), qaraarkani oo dhigaya isqorista xuduudaha Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) iskuulada ku yaala Koonfur-bari ee Portland ka hor inta aan la furin Dugsiga Dhexe Kellogg ee la cusbooneysiyeey xilliga Jiilaalka. Go'aanka dhammeystirka shaqada Wajiga 1aad ee [Isbahaysiga Hoggaanka Koonfur-bari](#).

Marka la eego xuduudaha isqorista ee la ansixiyey, barnaamijka deriska ee Iskuulada Arleta, Marysville, Creston iyo Lent waxaa laga bedeli doonaa Xannaanada Caruurta ilaa fasalada 8aad (K-8) nidaamka ah iyaga oo loo badali doona nidaamka K-5. Ardaydii fasalada 6-8 waxa ay u guuri doonaan laga bilaabo sanad-dugsiyeedka 2021-22 Dugsiga Kellogg.

Isbedelada lagu sameeyey soo jeedinta ee markii [hore golaha la soo bandhigay](#) kulankii bisha Janaayo 12keeda:

- Iskuulada Bridger iyo Creston waxa laga bedeli doonaa K-8 iyaga oo loo bedelayo inay noqdaan K-5 2021-22 halkii ay ka sugi lahaayeen ilaa sanadka soo socda ee markii hore la soo jeediyey. Tani waxay jawaab u noqoneysaa markii goluhu mudnaanta siiyey in laga guuro nidaamkii ahaa K-8 sidii ay ardaydeenu u heli lahaayeen dugsiyo dhexe oo leh waxbarasho dhammeystiran. Shaqaalaha PPS waxa ay kala shaqeyneyaa xubnaha bulshada qorshayaasha xilliga kala guurka ee isqorista ardayda Bridger barnaamijka dariska fasalada 6-8aad.
- Barnaamijkii Waxbarashada Lagu Qaadanayey Labada Luqadood Isbaanishka (DLI) ee Dugsiga Dhexe Mt. Tabor waxay sii joogayaan halkooda ilaa waqtigan xaadirka ah. Waxaa loo qorsheeyey inay u guuraan Kellogg sanad-dugsiyeedka 2021-22.
- Ardayda fasalada 6aad iyo 7aad ee sanadkani kuwaasi oo ku nool dersiyoy ka baxsan xuduudaha laakiin markii hore bedelkooda la ansixiyey inay tagaan iskuulada Arleta, Marysville, Creston iyo Lent, waxa ay guuri doonaan Kellogg. Sidaas darteed, ardayda fasalka 5naad ee sanadkani ee loo oggolaaday kana baxsan xuduudaha iskuulada Arleta, Marysville, Creston iyo Lent, kuwaasi oo aan ahayn barnaamijka gaarka ah, waxa ay ku

noqon doonaan iskuuladii dariskooda.

Qoysasku waxay dhammaadka bishani heli doonaan fariimo ku saabsan iskuulada ardaydooda lagu qoray inay wax ka bartaan. Qoysaska haya su'aalo waxa ay u diri karaan email halkan enrollment-office@pps.net ama waxa ay wici karaan telefoonka 503-916-3205.

Barnaamijka Dheelitirka iyo Isqorista Wajiga 2aad, wuxuu diirada saari doonaa xuduudaha PK-5 iyo sidii loogu dari lahaa in Harison Park lagana bedelo nidaamkii hore ee ahaa K-8 loona bedelo Dugsi Dhexe, taasi oo bilaabmi doonta bilowga bisha Maarso. Dukumentiyoy, fiidiyaal iyo diiwaano kale waxaad ka heli kartaan halkani pps.net/enrollmentbalancing.

Waad mahadsan tihiin.